

# Beerta Afarta Gabdhood ee Walaalaha ah (Four Sisters Farm)

## Xusida dhaqan iyo dhisida beel iyadoo la isticmaalayo beero bedelka dhexdooda ah ee xaafada East Philips

Degmada Hennepin (Hennepin County) waxa ay kala shaqeyneysaa Hay'ada Mac'hadka Horumarinta Beesha Dadka Dhulka Mareynkan loogu yimid (NACDI) (NACDI)] sidiis ay ugu bedeli lahayd sedex goobood oo isku dhagan oo dhul banaan ah oo ay leedahay Hay'ada Xadiidka Tareenada ee Nawaaxiga Degmada Hennepin [Hennepin County Regional Railroad Authority (HCRRA)] oo u dhow Midtown Greenway beer beledka dhexdiisa ah iyo meel umadda ay isugu soo baxdo.

Hay'ada NACDI ayaa maamuli doonta goobta Beerta Afarta Gabdhood ee Walaalaha ah (Four Sisters Farm) si ay ugu fidiso helida cuntooyin saxo leh ayna ugu noqoto goob lagu barto beer-falashada dadka dhulkan loogu yimid, dabiibkooda, iyo qaabab nololeedkooda.

Iskaashatada mashruucani waxa ay la shaqeyn doontaa Hay'ada (LHB Landscape Architecture) iyo Istuudiyo qorsheyn si loo qaabeeyo naqshada rugta ee mashruuca xusaya dhaqamada beeshada.

### Iskaashatada Mashruuca Hadafyada ay ku midoobeen

- Gargaarida amaanka beesha
- Soo dabaalida caafimaadka iyo fayoobida xaafadaha ku hareeraysan goobta iyo Beesha Dadka dhulkan Mareykanka loogu yimid ee bedelka ku nool
- Billida helid iyo dareen ku dheehan soo dhaweyn ee deegaanka Marinka Midtown (Midtown Corridor)

### Goobta iyo bulshada

Rugta mashruucu waxa ay ku hareer taal East 29<sup>th</sup> Street inta u dhaxeeysa Bloomington iyo (18<sup>th</sup> avenues south) oo aan ka dheerayn Midtown Greenway ee xaafada East Philips ee Koofurta Minneapolis. Dadka xaafada degani waxa ay soo kala jeedaan qaarumo badan oo aduunka oo dhan ka kala yimid, iyo xaafada Little Earth—oo ah guryo dowladeed oo isku bahaysteen Dadka Dhulka Mareykanka oo ka soo kala jeeda 39 qabiil. Boqolkiiba sideetan iyo todoba dadka deegaanka waa dad madow iyo dadka laga badan yahay isugu jira, 73% waxa ay ku hadlaan af aan Ingiriis ahayn kolka ay guryahooda joogaan.

## La soo Xiriirida

### Hennepin County Midtown Community Works

Crystal Myslajek  
Xiriiriyaha Mashruuca  
[crystal.myslajek@hennepin.us](mailto:crystal.myslajek@hennepin.us)

### Native American Community Development Institute

Mel Anderson  
Maamulaha Suuqa Beerta Afarta Gabdhood ee Walaalaha ah (Four Sisters Farmer)  
[manderson@nacdi.org](mailto:manderson@nacdi.org)

## Iskaashatada

- Hennepin County Regional Railroad Authority
- Hennepin County Midtown Community Works
- Native American Community Development Institute

## Shabakad (Website)

[hennepin.us/Midtown](http://hennepin.us/Midtown)

October 7, 2020



## Xiriirinta Beesha

Xubnaha beesha waxaa loogu baaqayaa in ay soo bandhigaan fakarkooda ku saabsan arrintan ayna ka qayb galaan waji kasta ee qorsheynta iyo dhaqan-gelinta mashruuca ah. Xaflada horudhaca ah ee furitaanka waxaa loo qorsheeyey inay ka dhaco **rugta mashruuca bisha Oktoobar 12keeda, 3-6 galabnimo**. Xiriiririno kale oo ku saabsan beesha ayaa dhici doona daynta 2020 oo dhan iyo qaboobaha 2021 ka si loo qorsheeyo hawlo kale, isticmaalada, iyo barnaamijyada rugta.

## Jadwalka

- Naqshada rugta iyo xiriirinta: Dayrta/qaboobaha 2020
- Dhisida iyo dhaqangelinta: Gu'ga 2021

## Iskaashatada Mashruuca

*Mac'hadka Horumarinta Beesha Dadka Dhulka Mareynkan loogu yimid (NACDI)*

NACDI waxa ay hirgelisaa xeelado casri ah oo beelaha lagu horumariyo kuwaa oo xoojiya gabi ahaanba waaritaanka guud iyo hagaagsanaanta dadka hindida Mareykanka ah iyo beelaha kaleba. Hay'ada NACDI ayaa maamuli doonta goobta Beerta Afarta Gabdhood oo Walaalaha ah (Four Sisters Farm) iyaga ayaana abuurdo doonta xanaanayna doonta, soo goyn doonta, qaybin doonta, suuq geyn doonta kaydina doonta dalaga soo go'a siina wadi doona horukaca isku xirnaanta beelaha.

*Hay'ada Hawlaha Degmada Hennepin ee Beesha Midtown [Hennepin County Midtown Community Works (MCW)]*

Barnaamijka Hawlaha Degmada Hennepin ee Beesha Midtown (Hennepin County's Midtown Community Works) waxa ay isu keentay iskaashato wada jir uga wada shaqeysa Wadiiqada Greenway (Midtown Greenway), si loo hagaajiyo xaaladaha dhaqaale ee Marinka Midtown (Midtown Corridor). MCW waxa ay hadda xooga saaraysaa dhamaystirka hagaajinta ugu dambaysa ee Marinka Midtown (Midtown Corridor), oo ay ku jiraan dhaqangelinta mashruuca Beerta Gabdhaha Walaaha ah ee Afarta ah (Four Sisters Farm).

*Hay'ada Xadiidka Tareenada ee Degmada Hennepin [Hennepin County Regional Railroad Authority (HCRRA)]*

HCRRA waa unug ka tirsan dowlada hoose ee deegaanka oo qayb ka ah Degmada Hennepin (Hennepin County) oo qasdigeedu yahay xafidida marinada xadiidka tareenadu maro ee laga guuray si gaadiid mustaqbalka loogu isticmaalo. Hay'ada HCRRA waxa ay leedahay 46 mayl oo marinada caynkaa ah oo uu ku jiro Midtown Corridor. Wadiiqooyinka faakihayga loo isticmaalo ayaa laga dhisay qaar badan oo marinada ah si si ku meel gaar ah loogu isticmaalo. Rugahaas waxaa loo isticmaali doonaa Beerta Afarta Gabdhood ee Walaalaha ah (Four Sisters Farm) waxaana iska leh hay'ada HCRRA.